



ismaamulka san diego

Warteena Biyaha ee Santa Margarita




Waraha biyuhu waa dhul soo jiita biyaha oo mara kanaallada, hawooyinka iyo wabiyada kadibna biyaha iskugu geeya meel godan – badanaa badda.

Warta biyaha ee Santa Margarita waa 1 kamid ah 11 warood ee biyaha ee ku dhex yaala Ismamaulka San Diego. Warta biyaha ee Santa Margarita waxay ka bilaabataa bariga Buurta Palomar meel u dhow Oak Grove. Biyaha ayaa intaas kadib gala Ismaamulka Riverside kahor intaysan kusoo laaban Ismamaulka San Diego, markaas oo ay ku darsamaan Badwaynta Baasifiga ee u dhow Oceanside. Haddii aad ku nooshahay aaga wartaan biyaha, talaabooyinka aad ku samayso gurigaaga iyo deegaankaaga ayaa naga caawin kara kor u qaadista tayada biyaha ku jira wabiyadeena, harooyinka, iyo badwaynta.



Qariirada Warta Biyaha ee Santa Margarita



Waxaan ku tiirsan nahay warteena biyaha xad ka badan inta aad isleedahay. Mar kasta oo aan ku lugayno wabiga Santa Margarita, ka kaluumaysano aana ku dalxiisno Harada O'Neill, Ka cab biyaha kaliya, waxaan isticmaalaynaa ilaheena biyaha wart.

Waxaan ka ilaalin karta wara'eenada biyaha dhowr tilaabood oo kaliya!

Biyaha soo raaca warteena biyaha ayaa soo qaada wasaqda sida nafaqooyinka, bakteeriyada, iyo qashinka, kaasoo sumayn kara marinadeena biyaha. **Muhiimada koowaad ee Warta Biyaha ee Santa Margarita waa in laga hortago sunta cuntada, sida sunta beeraha tusaale ahaan.** Marka aan nahay dadka deegaanka, waa hawl noo taala inaan nadiifino. Talaabada qof kasta ayaa isbadel wayn keenaysa.

Waxaad gacan ka gaysan kartaa ilaalinta warteena biyaha adoo qaadaaya talaabooyinka fudud si looga hortago wasaqda:



Nafaqooyinka | nitrogen iyo phosphorous

- Adeegso daawada beerta iyo sunta cayayaanka oo yar – inta badan geedaha ayaa u baahan wax ka yar cadadka lagu shubo.
- Xaaq qashinka caleenta iyo xashka geedaha. Xaqiiji inaad qashinka ku rido qasaca loo asteeyay.



Bakteeriyada | ku jirta wasaqda iyo bulaacada

- Ka ilaali fagaagaaga qashinka xayawaanka rabaayada ah. Qaado bac marka aad wado xayawaanka rabaayada ah oo si sax ah qashinkooda ugu rid qasacyada loo asteeyay.
- Daryeel sii nidaamka bulaacada ama daawaynta bulaacada. U soo sheeg dilaacyada ama daadashada bulaacada lambarka 858-505-6657.
- Si sax ah qashinka ugudar bulaacada RV adoo dhigaaya barta qashinka loo asteeyay.



Qashinka | ayna ku jirto qashinka geedaha

- Ku rid dhammaan qashinka qasacyada loo sameeyay oo daboolka u adkee.
- Booqo <https://wastefreesd.org/> si aad u hesho sida qashinka loogu daro ama dib loogu warshadeeyo agabka gaarka ah.

Ismaamulka San Diego iyo iskaashatadiisa ayaa sidoo kale ka wada shaqaynaaya ilaalinta caafimaadka wara'eenada biyaha.

Haddii aad doonayso inaad xog badan ka ogaato Warta Biyaha ee Santa Margarita, booqo www.projectcleanwater.org/santa-margarita-wma/

Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah ama aad U soo Sheegto Wasaqda Biyaha.

1-888-846-0800

watersheds@sdcounty.ca.gov ■ www.sandiegocounty.gov/stormwater